
Buug-Yaraha Hagaha Badbaadayasha ee The Sisterhood

Buug- yarhan waxaa loogu talagalay haweenka
qaxootiga ah ee ka badbaaday Xadgudubka ku
saleysan Galmada & Jinsiga ee wadanka Indonesia



Hordhac

Walaalayaashayda qaaliga ah,

Waxa aan nahay ka-badbaadayaal. Waxa aynu nahay dagaalyahano. Xataa iyada oo maalin walba nolosheenii hore ee noloshu ay ku dhegan tahay Indonesia, waligeen ma quusanno si kastaba ha ahaatee.


Hadii aad horey ula kulantay ama hadii aad hada la kulmeyso xadgudubka galmada iyo jinsiga ku saleysan (SGBV) waxaa jira caawimaad iyo gargaar aad heli karto.

Tilmaan-bixiyahan yar waxa uu hayaa macluumaad loogu talagalay haweenka qaxootiga ah ee ku nool Indonesia sida ay u soo sheegaan SGBV oo ay u helaan taageero. Wixii Faahfaahin dheeraad ah, fadlan la xidhiidh The Sisterhood si aad u hesho buug hage ah oo dhameystiran ama ka soo dejiso websitekeena: www.powerofsisterhood.net/sgbv-survivors.

Waxa aynu rajeyneynaa maalin uun in dhamaan haweenka qaxootiga ah inay dib u heli doonaan noloshii ay u qalmeen. Hagaha Ka-Badbaadayasha ayaa dooranaya inuu taageero haweenka qaxootiga ah ee isku dayaya inay istaagaan.

Si wada jir ah ayaan xoog ugu leenahay Walaalnimada Sisterhood.

**Nimco Adam Axmed,
Aasaasaha iyo Agaasimaha Ururka
Walaalnimada Sisterhood**



Macluumaadka Xiriirka Taageerada SGBV

CRS GBV Khadka Tooska ah

+62 811-9670-250

Waxaa la heli karaa 24 saacadooba
ee 7 maalmood todobaadka

Qeybta taageerada maaliyadeed ee CRS

+62 811-1499-871

Khadka Tooska ah ee CWS Health

+62 811-8161-511

IOM

+62 812-8165-0991

JRS Indonesiya

+62 813-3280-7441 (Jakarta)

+62 8134-0277-437 (Bogor)

LBH APIK Jakarta

+62 8138-882-2669

infojkt@lbhapik.org

SUAKA

+62 812-1237-8252

legalaid@suaka.or.id

Kooxda Ilaalinta Sharciga ee UNHCR

+62 811-9840-643

INSJA@unhcr.org



Noocyada iyo qaababka SGBV

Waxaa jira noocyo badan oo SGBV ah oo ay la kulmaan haweenka iyo caruurta.

Inta badan noocyada kala duwan ee SGBV waa sharci daro gudaha wadanka Indonesiya, iyada oo aan loo egeynin martabdada bulshada ama dhalashadada. Waxaa jira sadex sharci oo assasi ah.

Sharciga Indoniishiya ee lambar.23 (2004) ee ku saabsan ciribtirka rabshadaha qoyska

Sharciga Indoniishiya ee lambar.12 (2022) ee ku saabsan Xadgudubka Galmada

Sharciga Indoniishiya ee lambar.19 (2016) ee ku saabsan Macluumaadka Elektrooniga ah iyo Ganacsiga



Xadgub dhinaca shukaansiga ah



Dhaqan kasta oo xadgudub ah ama xakameynaya xiriirka jaceyl ee ka baxsan guurka.

Guur Qasab ah



Guurka qof ka soo horjeeda rabitaankiisa (iyagoon oggolaan buuxda oo xor ah haysan).

Dayacaad



In loo diido qof helitaanka adeegyada bulshada, sida adeegyada caafimaadka, waxbarashada, lacag/hanti, ama fursadaha nololeed.

Xadgudubka 'online'



Waa ficil kasta oo la sameeyo ayada oo la isticmaalayo tignoolajiyada taasoo keenta ama dhalisa waxyeelo jireed, galmo, maskaxeed, bulsho ama mid dhaqaale. Waxa kale oo loo sameyn karaa si loo dhaawaco sumcada qofka.

Kufsi



Waa isticmaalka xoog ama hanjabaad ah si qof loogu sameeyo galmo. Gelin aan raali laga ahayn (qasab) ah ee guska, qayb kale oo jirka ah, ama shay taas oo la galinayo qof jidhkiisa (sida siilka, futada ama afka).

Xadgudub Galmo



Nooc kasta oo xiriir galmo ah oo aan raali laga ahayn ama aan la rabin ama taabasho. Tani waxaa ka mid noqon kara galmo iyo/ama kufsi.

Dhibaateyn Galmo



Samaynta faalooyin galmo aan raali laga aheyn ama aan habboonayn, kaftan galmo la xidhiidha, ama in loo dhowaado oo la taatabto qof kale ama koox dad ah.

Xadgudub Jireed



Si ula kac ah in loo sababo (ama isku dayga in la sababo) xanuun ama dhaawac qayb ka mid ah jidhka qof kale (tusaale ahaan, wejiga ama gacmaha).

Dabasocosh



Si qarsoodi ah oo ula kac ah in qof loo daba socdo ama loo basaasayo qofkaas oo laga dabasocdo meel fagaare ah ama internetka (tusaale ahaan baraha bulshada). Fariimo aan la rabin, wicitaano ama hadiyado aan la rabin kuwaas oo abuuraya cabsi ama murugo galinaya qofka.

Xadgudub-nafsi ah ama Xad Gudub Dareen ama Shucuureed



Xanuun ama dhaawac maskaxeed ama shucuureed. Wax kasta oo la sameeyo si qof loo dareensiyo dhibaatooyin maskaxiyah ah, qiimo la'aan ah, ama qadarin la'aan taas oo ku saabsan sida ay isu arkaan, ama sida dadka kale ee qoyskiisa iyo/ama bulshada ay u arkaan. Tan waxaa ka mid ah hanjabaad, aflagaado, bahdil, go'doomin qasab ah iyo dabagal.

Ogolaanshaha

Dhammaan haweenka iyo gabdhuhu waxa ay xaq u leeyihiin inay bixiyaan oggolaanshaha ah (haa) ka hor hawl kasta.

Waa maxay oggolaanshaha?

- **Ogolaansho Xor ah:** Oo waxa aa dhahaysaa (haa) adigoon cadaadis, hanjabaad, ama wax qasab ah lagu geysan.
- **Ogolaansho la beddeli karo:** Xitaa ka dib markaad bixiso oggolaanshaha, waxaad bedeli kartaa go'aankaaga oo waad ka noqon kartaa oggolaanshaha.
- **Ogeysiin:** Waad fahansantahay waxa aad oggolaaneyso.
- **Ogolaansho xamaasad leh:** Waad ku faraxsan tahay inaad tiraahdo haa.
- **Ogolaansho Khaas ah:** Hadii aad hal shay oggalaatay oo aad ku tidhaahdo haa, macnaheedu maaha inaad wax kale tidhi haa.

Ogolaansho la'aan waxay ka dhigan tahay oo loola jeeda in mid ka mid ah dadka ku lugta leh ficilka ama hawsha uusan rabin inuu sameeyo ama, dhab ahaantii, uu si cad u sheegay in aysan dooneynin inay sameeyaan, laakiin weli lagu sii qasbayo ama lagu sii cadaadinay.



Sideen u gudbiyaa kiiskayga SGBV?



Tallaabada ugu horeysa ee la sameeyo si taageerada SGBV looga helo wadanka Indonesiya waa inaad la xiriirto hay'ad talo bixin ah oo aad ka warbixiso kiiskaaga.

Hadii aad joogto Jakarta, Bogor, Depok, Tangerang ama Bekasi, waxaa lagugula talinayaa inaad la xiriirto **Catholic Relief Services (CRS)** ee **GBV Lambarka Gaaban marka here**.



Lambarka Gaaban ee CRS GBV:

+62 811 9670 250 (*WhatsApp Keliya - Ingiriisi ama Bahasa*)

- Khadka tooska ah ee GBV wuxuu furan yahay 24 saacadood maalintii, 7 maalmood usbuucii (24/7).
- Khadka tooska ah ee GBV wuxuu furan yahay 24 saacadood maalintii, 7 maalmood usbuucii (24/7).

CRS waxay u isticmaali doontaa macluumaadka si ay u samayso **Warbixinta Dhacdada** (Waa warqad ama dokumenti faahfaahinaya waxa kugu dhacay).

Hadii aad bixiso ogolaanshahaaga ama aad ogolaato, Warbixinta Dhacdada waxa sidoo kale lala wadaagi doonaa UNHCR. CRS waxa laga yaabaa inay kugu xirto oo ay kula xiriirso ururo kale.

Hadii aadan joogin Jakarta ama meelo kale oo u dhow waa inaad la xiriirtaa UNHCR ama IOM si aad uga warbixiso kiiskaaga SGBV.

Habka kala horeysiinta dhacdada

Marka aad ka warbixinayso ama gudbinayso kiiskaaga waxaa lagu weydiin doonaa inaad sameyso 'habka ay dhacdada u kala horeysay iyo sida ay u dhacday.-sheekadada iyo warbixintaadu waa inay yeelataa tafaasiil ku saabsan waxa kugu dhacay oo ay ka mid yihiin arimahan soo socda:



Faahfaahinta Shaqsiya: Magacaaga, da'daada, ciwaankaga, xaalada guurka, aqoonsiga UNHCR, ama xog kasta oo muhiim ah oo aad haysato.

Goorta: Qiyaasta ama wakhtiga saxda ah ee ay dhacdadani dhacday.

Kuma: Sharaxaad ku saabsan dadka ku lugta kiiska oo ay ku jiraan naftaada, dembiilaha iyo, hadii ay jiraan, wax markhaati ah oo wax ka ogaa dhacdada.

Maxaa dhacay: Sharaxaad ku saabsan wixii dhacay, oo ay ku jiraan nooca xadgudbka galmada jinsiga (SGBV) ee aad la kulantay.

Halkee: Qiyaasta ama goobta saxda ah ee ay ka dhacday dhacdada ama falka.

Sababta iyo Sidee: Sharaxaad gaaban oo ku saabsan xaalada sidii ay aheyd inta lagu gudo jiray dhacdada iyo haddii ay suurtagal tahay, sharaxaad ku saabsan sida hay'ada la talinta ay kuu caawin karto.



Habka kala horeysiinta dhacdada waxa ay noqon kartaa mid gaaban, ilaa inta faahfaahinta ugu muhiimsan ay ku jirto.

Waxa aad keeni kartaa qof kasta oo aad ku kalsoon tahay (saaxiib, xubin qoyskaga ka mid ah, qareen, sharciyaqaan, turjumaan, wakiilka qaxootiga) si uu kuu raaco oo ku weheliyo marka aad qorayso habka ay u dhacday dhacdada ama falku.

Taageerada iyo adeega yada SGBV

Taageerada Sharciga ah



Sida uu dhigayo sharciga Indoneshiyan, dadka magangelyo doonka ah iyo qaxootiga waxay xaq u leeyihiin latalin sharci iyo wakiil, ha ahaato qareen lacag la siiyo oo lacag qaata ama adeeg sharci oo bilaash ah (gargaar sharci).

Hadii adiga ama caruurtaada aad kula kulanteen SGBV gudaha wadanka Indonesiya waxaad xaq u leedahay inaad u dacwooto booliiska.

Si aad u hesho talo sharci oo ku saabsan SGBV waxaad la xidhiidhi kartaa:

LBH APIK Jakarta: LBH APIK waxa ay leedahay qareeno iyo sharci yaqaano u tababaran ilaalinta iyo ka hortaga SGBV kuwaas oo caawin kara haweenka inta lagu jiro dhmaan nidaamka sharciga.

CRS: CRS waxay ku siinkaraan turjubaano bulsho iyo mufasiriin ku caawiya marka aad la kulmayso qareenka. CRS ma bixiso adeegyo sharci laakiin waxay kuu gudbin kartaa LBH APIK Jakarta.

Uma baahnid inaad tillaabo sharci ah ka qaado ama aad booliiska ku dacweyso dembiilaha hadii aadan dooneyn.

Uma baahnid inaad u sheegto booliska dambilaha si aad u hesho taageerooyin kale.

Marka aad ka warbixiso kiiskaaga waxa laga yaabaa in lagu siiyo talo sharci, xitaa hadii aanad doonayn in aad qaado tallaabo sharci ah.

Maxay noqoneysaa hadii aan rabo in aan qaado talaabo sharci ah?

Urada sida LBH APIK Jakarta ayaa ku caawin kara waqtiga nadaamka sharciga oo ay ka midyihiin:

Latalin sharci oo uu kiiskaaga kaasiyo abukaate xirfadle ha.

Gudbinta kiiska: Qareen ayaa qori doona taariikhdaada taariikheed (waqtiga dhacdooyinka).

Samaynta daawada booliska adigoo u gudbinaaya xarunta booliska saxda ah. Waxaa si wayn laguugu dhiiragalinayaa in aad kaxaysatid abukaate tababaran kaasi oo ku hadla luuqada Bahasa Indonesia.

Baarintaan: Baaritaanka waxaa samayn doona booliska iyo looyarka si ay u soo aruuriyaan faahfaahinta wixii dhacay, oo ay ka midyihiin cidii ku luglahayd, waqtigii iyo goobtii ay wax ka dhaceen.

Isku diyaarinta kiiska maxkamada iyo matalaada maxkamada: hadii aad go'oonsatid kiiskaaga maxkamada geysid, waxaa ku caawin kara looyarka qayb kasta.

Hadii aadan doonayn in aad kiiskaaga u gudbisid booliska ama aad martid nidaamka maxkamada, waxaa jira wadooyin kale sida dhexdhexadinta, wada xaalida, ama dalbashada ogeysiiska ('somas') looyarkaas ayaa ku caawin kara.

Taageerada Sharciga ah

- Looyarada qaarkood waxaa caawiya caawiyaal tababaran,
- Caawiyaasha looyarada waxay caawiyaan dhibanayaasha badbaaday ayagoo isticmaalaya qaabab aan sharciga ahayn waxayna u matalaan taageere guud ahaan waqtiga lagu guda jiro waqtiga boroseeska.
- Uruka SUAKA waxay leedahay caawiyaal looyarada ah oo tababaran kuwaasi oo ka soo jeeda bulshada qatootiga ah.



Cadaynta

Hadii aad haysatid cadaymo yar ama ay kaa luntay cadayntii, caawimaad bixiyahaaga sharciga ayaa kaa caawin doona in aad dhistid kiiskaaga.

Cadaymaha dhibaatooyinka maskaxda marwalba waxay u baahanyihiin baaritaan uu sameeyey dhaqtar xaga maskaxda ah ama cilmi nafsiga ah.

Waxay kusiin doonan waraaq kusaabsan xaaladaada caafimaadka maskaxda taasi oo kaa caawisa dacwada sharciga.



Waxyeelooyinka jirka, booliska ayaa ku geyndoona baaritaan uu sameeyo dhaqtar. Dhaqtarka wuxuu kusiin doona warqad sharci ah taasi oo muujinaysa xaaladaada caafimaad.

Baarintaanka waa in lasameeya sida ugu dhaqsiyaha badan markii ay dhibaataadu dhacdo.



Waxyaalaha kale oo cadaymaha ah waxaa ka mid ah

Dharkii

Sheeyadii

Sawiradii

Codadkii ama muuqaaladii laduubay

Iimayladii

Fariimihii

Iskiriin shoodadii lasoo dhigay baraha bulshada

Caafimaad Maskixiyah ah, Caawimo Nafsiyah ah iyo Latalin

Waxaad lahadli kartaa si kalsooni leh qof tabar u qaba cimi nafsiga ama lataliye adigoo kala xiriiraya CRS, LBH APIK Jarta ama JRS (Jakarta iyo xafiiska Bogor). Urada kale oo taqasuska ku ah waxaa ka mid ah:

Life Spring: WhatsApp (+62 851-0519-9922) u dhaxeysa 9am iyo 5pm ama weydii CRS, CWS ama UNHCR si ay kugu gudbiyan. Waxay ku siiyaan latalin lamaanayaasha, caruurta iyo shaqsiyaadka. Adeegaan maaha bilaash.

Yayasan Pulih: Waxay bixiyaan latalin nafsi ah xaga oon laynka luuqada Bahasa ee Indonesia (kaliya). Waxaad kala xiriirta WhatsApp ka ((+62 811-8436-633) ama booqo website kooda www.yayasanpulih.org/konsultasi-online.



Guriyeenta

Hadii aadan amaan ku heleyn joogitaanka gurigaaga, waxaad xaq u leedahay in aad heshid guri amaan ah oo ku meelgaar ah ('Rumah Aman').



Guriga amaanka ah waa hoy ku meel gaar ah kaasi oo kuyaala meel qarsoon waxaa sidoo kale gurigaas laga heli karaa baahiyaadka aas-aasiga ah oo ay ka mid yihiin raashinka ama caawinaad dhaqaale oo xadadan. Sharuueda guriga amaanka ah waxaa ka mid ah in aysan marti kusoo booqan karin ama aadna iska bixi karin kadib saacadaha bandowga.

Ugu horeyn waxaa waajib kugu ah in aad laxiriirtid CRS, JRS, LBH APIK ama UNHCR si aad u isticmaashid guriga amaanka ah. Waxaad sidoo kale la xiriiri kartaa UNHCR ama IOM si aad u codsatid guri kumeel gaar ah (tusaale ahaan kost ama apaartaminti).

Qarashaadka Nollosha iyo Caawinaada Lacagta cad ah

Waxaad codsan kartaa caawinaad dhaqaale oo kumeel gaar ah si ay kaaga caawiso in aad ku dabooshid qarashaadka waxyaalaha aas-aasiga ah (cuntada, sheyada nadaafada iyo baayahaadka maalinlaha ah). Cadadka lacagta caawimaada dhaqaale waa ay kala duwanyihiin waxaana lagu kala hormariyaa ayadoo loo eegaayo baahida ugu muhiimsan.



Waxaad ka codsan kartaa dhaqaalaha caawinaada CRS.

Hadii aad ku noo shahay Jakarta wayn iyo aageeda aadna ka diwaangashan tahay IOM, waxaad waydiisan kartaa caawimaad.

Caawimaad Daawo

Hadii aad lakulantid tacadiyo waxaad codsan kartaa daaweyn bilaash ah, oo ay ku jirto daawada isbitaalaka, aragtida dhaqtarka, daawada, ka hortaga(qorshaynta reerka) uurka iyo adeegyada kale oo la xiriira dhalmada.

Waxaad ka heli kartaa daaweyn caafimaad oo jaban **xarumaha caafimaad ee dowlada** (Puskesmas) iyo **isbitaalada** ("Rumah Sakit"). si aad u heshid xarunta kuu gu dhow ee Puskesmas waxaad karaadin kartaa google ka [goobtaada].

Caawimada **caafimaadka ee dagdaga ah** waxaad laxiriirta oo lagu farayaa xiriirka CRS GBV lambarka Gaagaban, CWS lambarka Gaagaban ee caafimadka ama JRS.




Waxaa ka jira adkeysii iyo awood Sisterhood

“Sisterhood waa ururkii ugu horeeyay ee aan ku biiray ee Jakarta taasoo ujeedkayga uu ahaa in aan nolol cusub bilawgeeda ka dhigto..... waxeyna nolosheyda u noqotey daaqadii rajada. Walaalo ka kala yimi bulshooyin kala duwan ayaa kusoo biiray si ay midba midka kale u xoojiyaan oo gacmaha isku qabsadaan.”

“Sisterhood waxa ay nolosheyda ku tahay sidii falaadho oo kale. Halkan waxaan ka helay koox iga caawiso in aan noqdo qof adag.”

“Marka la joogo sisterhood waxeynu aamini karnaa rajooyin, riyooyin. Sisterhood markaad eegto waxaynu noqon karnaa kuwo aaminsan in noloshan fog ee aan wacneyn inay ka dhigi doonto mid inoo iftiimisa.”





Jl. Gandaria 3, No. 53, Jagakarsa,
South Jakarta, Indonesia



hello@powerofsisterhood.net



[@sisterhood_community_center](https://www.instagram.com/sisterhood_community_center)



[TheSisterhoodCommunityCenter](https://www.facebook.com/TheSisterhoodCommunityCenter)



www.powerofsisterhood.net

© 2023 The Sisterhood. Dhamaan xuquuqda waa mid dhowrsan.

The Sisterhood waa urur ka diiwaangishan dalka indoniishiya weliba wasaarada sharciga iyo xuquuqaha beniaadamka (2023) iyadoo magaca ay ku diiwaangishantahay uu yahay Yayasan Sisterhood Persaudaraan Perempuan.

Version 1 (Somali Handbook) November 2023

Editors | Nimo Adam Ahmed, Victoria Forsgate, and Isabel Dunn

Illustrator & Designer | Aisyah Danti